**Washington State Department of CHILDREN, YOUTH & FAMILIES**

# Qiimeynta Halista-iyo-Faa'iidada iyo Horumarinta Yareynta loogu talagalay Barnaamijyada Daryeelka Carruurta ee Ku Saleysan Dabeecadda Dibedda (ONB)

**Benefit-Risk Assessment and Mitigation Development for Outdoor Nature-Based (ONB) Child Care Programs**

Iyadoo la raacayo xeerarka WAC 110-302-0400 iyo WAC 110-302-0471, codsadayaasha shatiga barnaamijka ONB waa in ay sameeyaan qiimeynta halista-iyo-faa'iidada oo ayna diyaariyaan siyaasadaha maareynta halista si ay ugu daraan buug-gacmeedyada waalidka iyo hawlwadeennada, ka hor inta aysan shatiga barnaamijka ONB ka helin Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska. Shuruudaha qiimeynta halista-iyo-faa'iidada iyo siyaasadaha maareynta halista waxaa laga heli karaa xeerarka lagu tixraacay WAC 110-302-0471 iyo Qeexidda WAC 110-300-0005.

Iyada oo la raacayo WAC 110-302-0110, hawlwadeennada waa in loo tababaraa qiimeynta halista-iyo-faa'iidada iyo siyaasadaha maareynta halista. Iyada oo la raacayo xeerka WAC 110-302-0310, adeeg-bixiyeyaasha waa in ay carruurta ka qaybgeliyaan qiimeynta ciyaarta halista ah ee koboc ahaan habboon inta barnaamijka lagu guda jiro.

Inta aadan foomkan buuxin, fadlan hubso in aad taqaanno kuwan soo socda:

**Qeexidda, iyada oo la raacayo xeerka WAC 110-302-0005:**
**"Qiimeynta halista-iyo-faa'iidada"** waxaa loola jeedaa, ujeeddooyinka barnaamijka ku saleysan dabeecadda dibadda, hannaan loo adeegsado aqoonsashada iyo diiwaangelinta halisaha iyo cunsurrada ciyaarta halista ah ee lala xiriirinayo ciyaarta dibadda lagu ciyaaro ee carruurnimada iyo sameynta qorsheyaan lagu yareynayo halista dhaawaca soo gaara carruurta iyada oo la joogteynayo dheefaha koritaanka ee ay carruurtu u leedahay. Hannaankan waxaa ka mid ah aqoonsashada noocyada halista ee ka jira goob ama waxqabad, suuragalnimada iyo darnaanta dhaawaca suuragalka ah, dheefaha suuragalka ah ee carruurta, hababka lagu yareynayo khataraha, t.a., baabi'inta, beddelka, gooni-yeelidda, ilaalinta, iyo maareynta halista, t.a., kor-u-qaadista kormeerka, dhiska, wax-ka-qabashada, iyo aqoonsiga cidda ka mas'uulka ah hirgelinta hababka habboon iyo goorta.
**"Khatar"** waxaa loola jeedaa il dhibaato oo aysan ilmaha u muuqan, sidaas awgeed dhaawaca suuragalka ah ee ka dhalan kara ayaa qarsoon; ama il waxyeello/dhibaato oo ka weyn mid ilmuhu uu awoodi karo in uu iska ilaaliyo.
**"Halis"** marka la isticmaalo iyada oo lala xiriirinayo "ciyaarta halista ah", waxaa loola jeedaa xaalad uu ilmuhu aqoonsan karo oo uuna qiimeyn karo caqabadda ka-dibna uu go'aansan karo tallaabada uu qaadayo, in kastoo ay suuragal tahay in uu dhaawac jiro. Xaaladdan, halista ayaa noqon karta mid lagama maarmaan ah oo faa'iido u leh koboca carruurta ee caafimaadqabka leh.
**"Ciyaarta halista ah"** waxaa loola jeedaa waxqabad jireed iyo ciyaar lagu loollamo kuna lug leh halista dhaawac jireed. Ciyaarta halista ah ee barnaamijyada ONB waxaa ka mid ah, balse aanan ku koobnayn oo keliya, ciyaarta ku lugta leh joogga, xawaaraha, qalab halis ah, u dhowaanshaha cunsurro halis ah, sida ku dhicidda wax sida suuragalka ah halis ah, iyo halista lumidda. Ciyaarta halista ah ayaa sidoo kale loo yaqaannaa "ciyaar faa'iido iyo dhibaatada leh."

**WAC 110-302-0471 Qiimeynta halista-iyo-faa'iidada ee ONB, siyaasadaha maareynta halista, iyo ka-tanaasulidda.**
(1) Barnaamijyada ONB waa in ay leeyihiin oo ay raacaan qiimeynta halista-iyo-faa'iidada iyo qorsheyaasha maareynta halista. Qiimeyntan iyo qorsheyaashan waa in loogu gudbiyaa DCYF foom ay bixiso waaxda oo waa in uu diyaar u ahaadaa dib-u-eegista waaxda waqtiga shati-bixinta hore. Qorshaha ama qiimeynta wax laga beddelay lama hirgelin karo ilaa ay waaxdu ka ansaxiso. Qiimeynta halista-iyo-faa'iidada waa in ay ka mid yihiin, balse aysan ku xaddidnayn, shuruudahan soo socda:
(a) Macluumaadka ku saabsan goobta ama goobaha uu si joogto u isticmaalo barnaamijka ONB.
(b) Xilliyada kala duwan ee sannadka sida qorshayaasha xagaaga iyo jiilaalka, iyada oo lagu saleynayo sida ay xaaladuhu isu-beddelaan gudaha goobaha iyo meelaha ONB ee sida joogtada ah loogu isticmaalo barnaamijka ONB.
(c) Waxqabadyada ciyaarka halista ah oo ay ka mid yihiin, balse aan ku xaddidnayn kuwan, soo socda:
(i) Qaybo dabiici ah oo la fuulo iyada oo la raacayo xeerka WAC 110-302-0146;
(ii) Waxqabadyo biyo iyada oo la raacayo xeerka WAC 110-302-0350;
(i) Isticmaalka qalab afaysan iyada oo la raacayo xeerka WAC 110-302-0352;
(iv) Dhir raadin/goobid iyada oo la raacayo xeerka WAC 110-302-0346;
(V) Xayawaannada rabbaayadda ah ee barnaamijka ONB iyada oo la raacayo xeerka WAC 110-302-0225;
(vi) Ukun ururin iyo isticmaal iyada oo la raacayo xeerka WAC 110-302-0196;

(ii) Waxqabadyada dab-shidka iyada oo la raacayo xeerka WAC 110-302-0351; iyo
(viii) Waxqabadyada u dhow biyaha, qararka, hoobadka dheer, ama qaybaha dabiiciga ah ee kale ee sida suuragalka ah khatarta ah.
(d) Hagidda loogu talagalay marka shaqaale badan ay lagama maarmaan yihiin, iyo bixinta hagid loogu talagalay diyaarinta siyaasadaha maareynta halista ee la adeegsan karo iyo habraacyada lagu sharxay qayb-hoosaadda (2) ee qaybtan.
(2) Barnaamijyada ONB waa in ay leeyihiin oo ay raacaan siyaasadaha maareynta halista iyo habraacyada wax looga qabanayo khataraha iyo halisaha suuragalla ah ee barnaamijyada ONB. Kuwan waa in ay ka mid yihiin, balse aan ku koobnayn, siyaasaha ama habraacyadaha la xiriiran kuwan soo socda:
(a) Dhiirrigelinta duurjoogta iyo xayawaannada rabbaayadda ah ee aan ahayn kuwa barnaamijka ONB iyada oo la raacayo WAC 110-302-0225 iyo 110-302-0353;
(b) La dhaqanka ama tacaamulka dadka galtida ah, xaddidista xiriirka kormeer la'aanta ah ee lala yeesho cunug kasta oo daryeelka ku jira, iyada oo la raacayo WAC 110-302-0345;
(c) Isticmaalka la wadaago ee goobaha dadweynaha;
(d) Cimilo-gooreedda u baahan isticmaalka hoyga xaaladaha degdegga ah;
(e) Dharka loo baahan yahay iyo in carruurta loo xiro dharka cimilada iyada oo la raacayo WAC 110-302-0147;
(f) Isticmaalka dhismeyaasha ama xarumaha dadweynaha;
(g) La kulanka sinjiyada sunta ah; iyo
(h) Dhammaan xaaladaha kale ee khatarta suuragalka ah leh iyo qaybaha dabiiciga ah.
(3) Waalidiinta ama mas'uuliyiinka waa in ay saxiixaan ka-tanaasulka halista barnaamijka ONB ee qiraya isla-markaana oggolaanaya khataraha iyo halisaha suuragalka ah ee la xiriira barnaamijyada ONB. Habraacyada ama siyaasadaha maareynta halista ee ku habboon barnaamijyada ONB, sida lagu qeexay qayb-hoosaadda (2) ee qaybtan, oo ay la socoto ka-tanaasulka waalidka, waa in lagu daraa buug-gacmeedyada waalidka, iyada oo la raacayo WAC 110-302-0450.
(4) Nuqulka ka-tanaasulka ee uu saxiixay waalidka ama mas'uulka ubadka waa in la geliyaa diiwaannada ubad kasta.

**Tilmaamaha**: Buuxi shaxda hoose ee loogu talagalay goob iyo/ama waxqabad kasta ee uu barnaamijkaaga ka sameeyay falanqeynta halista-iyo-faa'iidada iyo habraaca yareynta. Tusaale ayaa la bixiyay.

| **Goob ama Waxqabad** | **Dheefaha** | **Khataraha iyo Halista – eeg qeexidda – Kuddar isbeddello xilliyeedka deegaanka, diyaar-garowga hawlwadeennada, iyo baahiyada koritaanka carruurta hadba sida ku habboon** | **Xeerarka WACs ee Khuseeya Barnaamijka ONB** | **Habraaca Yareynta – waxa hawlwadeennadu ay tahay in ay sameeyan si ay u taageeraan faa'iidooyinka waxna uga qabtaan khatarta iyo halisaha waxqabadka ama goobta. Kuddar baahi kasta ee loo qabo hawlwadeen dheeraad ah ama tababarka hawlwadeenka.** |
|---|---|---|---|---|
| *TUSAALE:*<br>*Geed Fuulid* | *TUSAALE:*<br>*Xirfadaha dhaqdhaqaaqa guud, isku dheelitirnaanta, falanqeynta halista iyo wacyigelinta, qorsheynta, go'aan-qaadashada, qofka markiisa waxqabashada, war-isgaarsiinta, dhisidda isla-hanweynaanta, kobcinta dareenka, isuduwidda gacanta/cagta/isha, xoog dhisidda, debecsanaanta, dulqaadka, iyo tamar siideyn.* | *TUSAALE:*<br>*Dhicidda, kufidda, dillaaca jirka iyo murxidda, dusha dulka ee adag – dhaawaca madaxa ee suuragalka ah, walxo afeysan ama adag ee gudaha iyo hoosta geedka, ubadka oo aan koriin ahaan awoodin in uu qiimeeyo awoodda, arrimaha wax-barista iyo kormeerka hawlwadeenka cusub ee aan tababarneyn, xaalado baraf ama qabow ee geedka ka dhiga mid lagu kufi karo, hawlwadeenka oo aan si habboon ugu diyaarsaneyn gargaarka degdegga ah iyo awoodda lagu gaarayo dhexda cunuga, iyo awoodda uu cunuga u leeyahay in uu fuulo meel uusan qofka hawlwadeenka ah gaari karin* | *TUSAALE:*<br>*0146; 0345; iyo 0110* | *TUSAALE:*<br>*Hawlwadeenka oo geedka ka baaraya laamo debecsan ama khatarro kale. Hawlwadeenka wuxuu waqti kastaba awoodaa in uu gaaro dhexda ubadka. Hal cunug ayaa marba fuula. Carruurta sugeysa markooda ayaa si firfircoon loogu kormeeraa hawsha kala-guurka ee habboon. Hawlwadeenka waxaa loo tababaraa in uu ka faa'iido qiimeynta halista iyo siyaasadda ka hor inta aysan carruurta ka caawin waxqabadka geed fuulidda. Hawlwadeenku wuxuu qiimeynayaa awoodda cunug kasta, cimilo-gooreedda iyo xaaladaha xilliyada, shuruudaha/khataraha dusha dhulka ka hor inta aanan la oggolaan waxqabadka geed fuulista.* |

| | | | | |
|---|---|---|---|---|
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |
| | | | | |